Ombudsman Western Australia

WARQADA MACLUUMAADKA

Cabasho u gudbinta Ombudsman ka

Somali
Revised
October 2018

Miyaad heysaa cabasho ku saabsan wakaalad ka mid ah Dawlada Galbeedka Australia, dawlada hoose ama jaamacad aadan la xalin karin? Waxaana laga yaabaa inuu Ombudsman ku caawin karo. Adeegyadeenu waa bilaash.

Ombudsman ku waa qof dhexdhexaad ah oo madax bannaan oo baara xaliyana cabashooyinka xubnaha dadweynaha ee ku saabsan hay'adaha dadweynaha ee galbeedka Australia. Hay'adaha dadweynaha waxaa ka mid ah:

- Wakaaladaha dawlada WA waxaa ka mid ah wasaaradaha, gudiyada iyo hay'adaha dastuuriga ah;
- Dawladaha hoose waxaa ka mid ah, magaalooyinka waa weyn, kuwa yar yar iyo shires ka; iyo
- Jaamacadaha.

Muxuu baari karaa Ombudsman ku?

Ombudsman wuxuu baari karaa cabashooyinka ku saabsan go'aan gaarida iyo waxqabadyada hay'adaha dadweynaha ee WA si loo ogaado inay sharci yihiin, sinaan iyo macquulba.
kuwaan waxaa ka mid ah cabashooyinka ku saabsan adeegyada dadweynaha sida:

- caafimaadka
- waxbarashada
- guriyeynta
- dawlada hoose
- gaaddiidka
- ilaalinta ilmaha
- xabsiyada
- jaamacadaha

Miyuu jiraa wuxuusan Ombudsman ku baari karin?

Ma baari karno cabashooyinka ku saabsan:

- Shakhsiyaadka gaarka ah ama ururada sida bangiyada, dukaamada, dadka xirfadlayaasha ah ama deriska;
- Go'aamada Wasiirada Dawlada, maxkamadaha sharciga iyo saraakiilsha kale qaarkood; ama
- Arimaha maxkamad la geyn karo ama taraabuunaal ama arimaha ka badan 12-ka bilood (waxaa laga yaabaa inay jiraan qaar laga soo reebayo).

Haddii aanan ku caawin karin, waxaan iskudeyi doonaa inaan kula xiriirino qof ku caawin kara.

Ombudsman wuxuu caawiyaa hay'adaha dadweynaha inay hagaajiyaan waxqabadkooda maamul iyadoo ay faa'iido u leedahay dhammaan dadka reer West Australia iyagoo la ogaanayo dhibaatooyinka wixii abuuray iyo talooyin ka siinta isbedelada nidaamyada, waxqabadyada, qorshayaasha ama sharciga si looga hortago inaysan dhicin dhabaatooyin la mid ahi.

Adeegyada Ombudsman ku qof walba waa u bilaash.

Cabashadaadu ma qarsoon tahay?

Baaritaanada Ombudsman waxaa ku xiran inay qarsoodi ahaadaan sida waafaqsan sharcigeena xukunka. Macluumaadka aad ka bixisid cabashada ee adiga kugu saabsan waxaa loo isticmaali doonaa oo kaliya qiimeynta iyo baaritaanka cabashadaada, ama sida sharcigu doonayo.

Sidee u cabaneysaa?

Waad na soo booqan kartaa ama taleefan u soo diri kartaa xafiiskeena si aad dhibka uga hadashid. Cabashadaadu waa inay ahaataa qoraal. Waxaad na weydiisan kartaa anaga ama qof kale inuu ku caawiyo haddii ay kugu adag tahay inaad qorto cabashadaada. Waxaad u baahan doontaa inaad na siiso faahfaahinta arinta aad dooneysid inaad ka cabatid iyo wixii dukumiinti ah ee la xiriira. Foomka cabashada waa la helayaa si loo daabacdo ama lagu buuxiyo online iyo website keena ah www.ombudsman.wa.gov.au. Sidoo kale warqad baad noo soo qori kartaa ama ku soo xaree foomka cabashada oo buuxa boosta ama iimeyl, ama xafiiskeena keen.

Maxaan ku sameynaynaa cabashadaada?

Waxaan eegi doonaa cabashadaada oo aan go'aamin doonaa inaan baarno iyo in kale. Waxaan kula socodsiin doonaa natiijada. Haddii aan baarno, ma qaadanayno dhinacna waana dhageysaneynaa labadiina dhinac adiga iyo hay'ada dadweynaha. Haddii aan helno in wax khaldan yihiin waan kula hadli doonaa iyo hay'ada dadweynaha wax ku saabsan sidii dhibaatada loo xalin lahaa. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaan ku talino in hay'ada dadweynuhu inay wax ka bedesho sida ay u shaqeyso si looga hortago in isla waxaasi ay mar labaad kugu dhacaan ama qof kale mustaqbalka.

Ombudsman wuxuu raadinayaa in loo xaliyo cabashooyinka sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah laakiinse qaar ka mid ah cabashooyinka aad u sii adag inay qaadan karaan wakhti ka dheer.

Cabasho gudbinta

Wax dhib ahi ma kaa heysataa hay'ad dadweynaha ee WA?

↓

Kala hadal qof marka koowaad hay'ada dadweynaha.

↓

Haddii aan dhibkaaga la xalin,
La hadal qaybta cabashada hay'ada dadweynaha.

Haddii aanan dhibkaaga weli la xalin, wac Ombudsman ka.

Waad nala hadli kartaa adoo isticmaalaya Adeega Turjubaanka ama Adeega Tebinta Qaranka haddii aad dooneysid.

Haddii aan u maleynayno inaan ku caawin karnolp,
waxaa laga yaabaa inaan ku weydiino inaad warqad noo soo qorto.
waxaad na weydiin kartaa ama qof kale inay kaa caawiyaan qoritaanka cabashadaada.

↓

Waxaan eegi doonaa cabashadaada and oo aan kuu sheegi karnaa waxaan sameyn karno.
Marmarka qaarkood ma nihin dadka saxda ah ee ku caawin lahaa laakiinse waxaan kaa caawin doonaa helida ciddii ku caawin lahayd..

↓

Haddii aan wax qaban karno.
waxaa laga yaabaa inaan ku weydiino ama hay'ada dadweynaha ee aad ka cabaneysid wixii macluumaad dheeraad ah.

↓

Waxaan ku soo ogeysiin doonaa natiijada.
haddii aan ogaano in wax khaldan yihiin, waan idinla hadli doonaa adiga iyo hay'ada dadweynaha inaad xalisaan.

Ombudsman Western Australia

Call us 08 9220 7555 or **Freecall** 1800 117 000 (free from landlines)

Interpreter Service 131 450 National Relay Service 1800 555 660 (Quote 08 9220 7555)

Email us at mail@ombudsman.wa.gov.au **Website** www.ombudsman.wa.gov.au

Visit us at Level 2, Albert Facey House, 469 Wellington Street Perth WA 6000

Write to us at PO Box Z5386 St Georges Terrace Perth WA 6831